

Mabaadi'ida Hagida WIDA ee Hormarinta Luuqada

Mabaadi'ida Hagaya Horumarinta Luqadda waxay tusaale u yihiin guud ahaan caqiidooyinka aasaasiga ah ee WIDA iyo Falsafadda ku salaysan in Wax Walba La Samayn Karo.

Hadda, buug yarahan sharraxan wuxuu nooleynayaa mid kasta oo ka mid ah mabaadi'ida hagida!

Macluumaadkan u isticmaal waalidiinta, qoysaska, iyo xubnaha bulshada si aad ugu hagto wadhadallada ku saabsan fikradaha soo socda:

- Xushmeynta iyo weynaynta muhiimada luqadaha iyo dhaqamada guriga
- Fahmidda horumarka iyo waxbarashada luqadda ardayda ku hadla luqadaha badan
- U doodista fursadaha iyo aragtiyaha gaarka ah ee ardayda luqadaha badan ku hadla ay keenaan dugsiyadeenna K-12
- Ka faaideysiga asalada kala duwan ee ay ka soo jeedaan ardayda luqadaha badan ku hadla si loo kobciyo barnaamijyada waxbarashada, fasallada, bulshada, iyo wixii intaas dheer



WIDATM

Mabda'a #1 ee Hagida

Ardayda leh luuqadaha iyo dhaqamada kala duduwan waxay faa'iido qiimo leh u keenayaan nolosha waxbarashada iyo nolasha fasalka; isticmaalida waxyaabahaas muhiimka u ah iyo caqabadaha eexashada waxay gacan ka geystaan hormarinta madax banaanida ardayda barta luuqadaha badan sidoo kale waxay hay'adooda ku dhiirigeliyaan waxbarashada




Mabda'a #2 ee Hagida

Horumarinta luuqadaha badan ee ardayda ku hadla luuqadaha badan waxay sare uqaadaa aqoontooda iyo dhaqankooda, awoodooda aqooneed, iyo dabacsanaantooda isticmaalka luuqadaha.



Mabda'a #3 ee Hagida

Hormarinta luuqada iyo waxbarashada ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay dhacaan waqti ka dib iyaga oo laga qeybgelinayo hawlaha laga qiimeeyo guryahooda, iskuuladooda, iyo bulshadooda.




Mabda'a #4 ee Hagida

Hormarinta/kobcinta luuqada, shucuur-bulsheedka, iyo garaadka ardayda luuqadaha badan ku hadla waa habraacyo iskuxiran oo gacan ka geysta guusha iskuulka iyo wixii intaas dheer.



Mabda'a #5 ee Hagida

Ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay isticmaalaan ayna hormariyaan luuqada markii fursadaha waxbarashadu lagu tixgeliyo waaya-aragnimadooda shaqsiyeed, sifooyinkooda, awoodahooda, iyo heerarkooda aqooneed ee luuqadda.




Mabda'a #6 ee Hagida

Ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay isticmaalaan sidoo kalena hormariyaan hawlaha sida muuqda qaybta oga ah mawduucyada kala duduwan, oo ay kujiraan hadalka, qoraalada, muuqaalada, iyo xariirka dhaqdhaqaaqinta xubnaha.



Mabda'a #7 ee Hagida

Ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay isticmaalaan sidoo kalena hormariyaan turjumaada iyo helida macluumaadka, fikradaha, iyo ra'yiga oo ay ka helaan meelo badan oo kala duduwan, oo ay ka mid yihiin waxyaabaha nolasha dhabta ah ka turjumaaya, mawduucyada, soojeedinada, iyo qoraalada qaababka kala duduwan u qoran.



Mabda'a #8 ee Hagida

Ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay isticmaalaan wacyigooda caqliyeed, aqoontooda luuqadeed, iyo wacyigooda dhaqameed si ay u hormariyaan waxtarka isticmaalka luuqada.


Ok, exponent = expoente
em português.
That makes it easier!

It says, refer to the table...

wait, table can be




or




.

Since this is Math, they mean



Do I understand
this idea? Yup, I've
got it. I can move on
to the next!




Mabda'a #9 ee Hagida

Ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay isticmaalaan awoodooda luuqadeed oo buuxda, oo ay kujirto dhaqanka isku darka luuqadaha, si ay u kobciyaan horumarka iyo barashada luuqadooda.

What does the author mean cuando escribe, "he put his foot in his mouth?"

No estoy seguro... pero I think it's like when I was eating almuerzo con mi abuelita and I said that my Mom's caldo didn't taste good. And then I found out that it was my abuelita who made it!

Now I get it, pero, ¡ay! How embarrassing!



Mabda'a #10 ee Hagida

Ardayda luuqadaha badan ku hadla waxay isticmaalaan ayna kobciyaan luuqada si ay ugu turjumaan una soo bandhigaan aragtiyo kala duduwan, sidoo kalena una dhisaan xariirka wacyigelinta, iyo xaqiijinta aqoonsigooda.





Waxbadan ka baro Mabaadi'da Hagaya WIDA ee Horumarinta Luqadda oo laga heli karo websaydhka WIDA wida.wisc.edu.